

Ilmo iska soo ridida

Inaad ilmo iska soo rido micnaheedu waxaa weeye inaad dooratay inaad uurkaaga iska soo rido. Dhamaan uurku ma aha mid la qorsheeyey. Uurka aan la qorsheyn wuxuu ku dhacaa dhamaan dumarka da' kasta iyo asaloba. Qiyaastii kala badh uurka Australia dhexdeeda waa kuwo aan la qorsheyn. Dumarka qaarkood waxay doortaan inay ilmahooda dhalaan, iyadoo kuwa kalena ay doortaan inay uurkooda iska soo ridaan.



Waa maxay ilmo iska soo ridid?

Ilmo iska soo rididu waa nidaam caafimaad oo amaan ah oo aad uurka ku rideyso. Waxaa laga yaabaa sidoo kale in la yiraahdo 'joojin'ama joojinta uurka'. Waxaa lagu qiyaasayaa in ku dhawaad saddex meelood meel uur aan la qorsheyn uu dhammaaday.

Ilmo iska soo rididu ma sharci baa Australia dhexdeeda?

Ilmo iska soo rididu Australia dhexdeeda wuxuu sharci noqonayaa oo kaliya haddii uu sameeyo xirfadle caafimaad. Laakiinse sharciyada ilmo iska soo rididu way ku kala duwan yihiin gobolada iyo territories ka. Sharciyada kala duwan waxay ku saabsan yihiin sida iyo goorta dumarku ay sameyn karaan ilmo iska soo ridida.

Sababaha ilmo iska soo ridida

Ilmo iska soo rididu waa doorasho shakhsiyeed. Wuxuu noqon karaa go'aan adag in la sameeyso. Waxaa jira sababo fara badan oo ah sababtaad u dooran karto inaad uurka iska soo riddo. Sabab kasta ha ahaatee, waa doorashadaada inaad uurka iska soo riddo.

Noocyada ilmo iska soo rididda

Waxaa jira laba nooc oo ilmaha laysaga soo rido: ilmo iska soo ridida daawo cunida iyo qaliin iskaga soo rididda. Labaduba waa amaan waana lagu guuleystaa.

Ilmo iskaga soo ridida daawo

Daawo iskaga soo ridida micnaheedu waa inaad qaaddato daawooyin si aad uurka iska soo riddo. Waxaa lagu sameyn karaa uurka ilaa sagaal toddobaad.

Maxaad ka filan kartaa

Haddii aad sameeyso ilmo iskaga soo ridida daawada, waxaa yeelan doontaa dhawr saacadood oo casiraad daran, laakiinse xannuunku waa inuu kaa fududeeyaa markaad ilmaha iska soo riddo. Dhakhtarkaagu ayaa kuu qori kara daawada xannuunka oo xoog badan si ay kuu caawiso. Waa in aad awooddo inaad guriga ku maareysid.

Ilmo iskaga soo rididda qaliinka

Haddii aad sagaal toddobaad ka badan uur leedahay, ama aadan dooneynin daawo ilma iskaga soo ridida, waxa aad dooran kartaa inaad iskaga soo riddo qaliinka.

Ilmo iskaga soo ridida qaliinka waxaa badanaa lagu sameeyaa nidaam maalmeed ahaan.

Maxaad ka filan kartaa

Haddii aad sameeyso ilmo iskaga soo ridida **qaliin suuxinta guud** (intaad huridid), ma dareemi doontid wax xannuun ah inta ilmaha lagaa soo ridayo. Laakiinse waxaa laga yaabaa inaad yeelato casiraad dhowr maalmood ka dib.

Haddii aad ilmo iskaga soo riddid qaliinka **suuxinta goobta qaliinka**, waxaa laga yaabaa inaad dareento casiraad ama xannuun fudud ilaa mid culus inta ilmo iska soo ridida lagu jiro. Sidoo kale waa caadi inaad yeelato casiraad iyo xannuun la mid ah ka caadada maalmaha yar ee ku xigga.

Si aad xannuunka isaga yareyso, waxaad sameyn kartaa:

- isticmaal xirmooyinka kuleylka
- qaado daawooyinka xannuunka kaa jebinaya
- duug calooshaada hoose
- naso.

Haddii uu ku hayo xannuun daran, ama xannuun oo aan kaa tegaynin markaad qaadato daawaynta xannuunka, la hadal dhakhtarkaaga.

Goormaad ku noqon kartaa waxqabad kaaga caadiga ah?

Waxaad ku noqon kartaa wax qabadkaaga caadiga ah maalinta ka dambeysa ilmo iska soo rididda haddii aad dareento jir ahaan iyo maskax ahaanba aad fiican tahay. Laakiinse toddobaad ama labada toddobaad ee ku xigga, waa inaad iska ilaalisaa:

- qaadida wax culus, shaqada xooga ah iyo waxqabadka adag
- Galmada, isticmaalka suufka dumarka iyo inaad wax gelisid cawradada (siilkaaga)
- Qubeyska ama inaad dabaal aado.

Waa imisa kharashka ilmo iska soo rididu?

Kharashka ilmo iska soo rididu wuxuu ku xiran yahay:

- nooca ilmaha layskaga soo ridayo
- heerka uu uurkaagu marayo
- meeshaad ilmo iskaga soo riddo ku sameynaysid (tusaale rug caafimaad oo gaar loo leeyahay ama mid dadweyne)
- haddii aad xaq u leedahay Medicare
- haddii aad leedahay caymiska caafimaadka ee gaarka ah
- Haddii aad u baahan tahay inaad u safartid rugta caafimaadka.

Haddii aad leedahay kaarka Medicare ka oo aad booqatid rugta caafimaadka gaarka ah:

- daawo ilmaha iskaga soo rididu waxaa laga yaabaa inay kugu kacdo \$100 - \$500
- qaliin ilmaha iskaga soo rididu waxaa laga yaabaa inay kugu kacdo \$400-\$600.

Rugaha caafimaadka qaarkood ama isbitaalada dadweynaha waxaa laga yaabaa inay leeyihiin lacago ka

hooseeya ama waxaaba laga yaabaa inaan waxba lagaa qaadin haddii aad u qalanto. Dhakhtarkaaga ayaa ku siin kara macluumaad intaa ka sii badan.

Miyaad u baahan tahay in dhakhtar ku soo gudbiyo si aad ilmaha iskaga soo riddo?

Uma baahnid inuu dhakhtarkaagu ku soo gudbiyo si aad u balansato ilmo iska soo rididda – Galbeedka Australia mooyee oo sharci ahaan looga baahan yahay.

Miyaad u baahan tahay inaad hesho la talin ka hor intaanad ilmo iska soo riddin?

Uma baahnid inaad heshid la talin, laakiinse waa la helayaa haddii aad dooneysid inaad qof la hadashid ama aad u baahan tahay macluumaad intaa ka sii badan.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilmo iska soo rididda:

- dhakhtarkaaga
- ururka caafimaadka galmada ama qorsheynta qoyska ee goobtaada
- xarunta caafimaadka ee dumarka degaankaaga
- [Adeegga Caafimaadka ee Aboriginal iyo Torres Strait Islander](#)

Waxaad sidoo kale booqan kartaa website-dadan sumcadda leh layskuna haleyn karo:

- [MSI Australia](#) (hore u ahaa Marie Stopes Australia)
- [1800MyOptions](#) (VIC)
- [Children by Choice](#) (QLD)
- [Pregnancy Choices Helpline](#) (NSW)
- [Pregnancy Choices Helpline](#) (SA)

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo jeanhailes.org.au/health-a-z/sex-sexual-health/abortion

Waxaa la cusbooneysiyeey Sibteembar 2022

Warqadaan xaqiiqda waxaa loogu talagalay inay noqoto mid waxbarasho iyo warbixineedba ah Looguma talagalin in lagu bixiyo talo caafimaad oo gaar ah ama lagu beddelo talada dhakhtarkaaga.

Jean Hailes for Women's Health waxay si mahad naqleh u aqoonsatay taageerada Dawlada Australia.

© Jean Hailes for Women's Health 2022

Jean Hailes waxay qaaday talaabo ku dareysa ama keenaysa mawduuca caafimaadka dumarka. Erayada 'dumar' iyo 'gabdho' waxaa loo isticmaalaa dhamaan ishan macluumaad si loo tixraaco dhamaan dumarka, gabdhaha, iyo dadka jinsi ahaan kala duwan.

Jean Hailes
FOR WOMEN'S HEALTH

Taleefanka 03 9453 8999
jeanhailes.org.au